OTTAWA POLICE SERVICE
SERVICE DE POLICE D'OTTAWA

Working together for a safer community
La sécurité de notre communauté, un travail d'équipe

Qaybta Danbiyada Nacaybka

Cawimaada Magaalada Ottawa si Looga xoreeyo Cadaawada

www.ottawapolice.ca

Waa maxay Dambiga Nacaybku?

Dambiga Nacaybku waa Danbi laga gali karo qof ama hunti, oo ay katimid nacayb loo qabo qofkaas jinsigiisa,lahjadiisa,dhaqankiisa, diintiisa, da'diisa,lixaad li'diisa,ama waxyaabakale oo waxaas la dhigma.

Maxaa loo dajiyey sharciyada u gaar ah kahortagida nacaybka?

Dambiyadaasi waxay keenaan dhibaatooyin aad u fog aadna u fara badan oo daafsan dhibanaha jirkiisa iyo caatifadiisaba, ayadoo isla markaana ku fidi karta xubnaha ururada iyo bulshooyinka guud ahaanba. Dambiyadaasi waxa kale oo ay xoojinayaan gooni u socodka qofka ay dhibtu gaadhay , taasi na waxay walwal iyo halis u keeni doon taa bulshada qofkaasi uu ka tirsan yahay.
Hadii markaasi arintaa laga gaari waayo waxaa dhici karta in ay bulshooyinka kala duwani ay is afgaran waayaan oo ay xagaasi ku dumaan. Wax yaabahaasina waa waxii ay ku kacaan dadka nacayb ku jirto.

Maxaynu u leenahay sharciyo ka soo horjeeda Nacaybka?

Dhibaatooyinka ka dhaca meelaha ay ka mid yihiin dugsiyada waxbarashada iyo shaqooyinka, ama diidista shirkadaha qaarkood iyo dadka guryaha kireeya in ay si sinayn idinla dhaqmaan, ma aha arimo loo adkaysan karo.

Waxaad markaasi gargaarsan kartaa lajnadaha qaabilsan xuquuqda aadamiga iyo siyaasadaha daakhiliga ee ay shirkadahu leeyihiin. Taasi oo ay dadku badanaa aad u qiimayn, laakiin waxaa dhici karta in ay wax wayn ka qabato dhibaatooyin ka aad la kulantid.

Maxuu dhibanahu uga hadli laayahay danbiga laga galay?

Sababaha kamid ah in uu dhibanahu uga hadli laayahay danbiga laga galey:

- Kabaqid in dhibaato labaad loo geesto.
- Kabaqid in ay nolol khaas ah yeelan.
- Dhibaatooyin ay ku qabaan dhaqanka iyo afafka.
- Cabsi ay ka qabaan immigrationka.

Maxaan isugu kalifayaa in aan u sheego danbiga la iga galay?

Sheegista danbiyada cadaawadu waa muhiim, sababtoo ah waxa ay joojinaysaa nacaybka asalkiisaba, talabaadna muhimadeedu waxay tahay si ay dadkale dhibaato uga soo gaarin. Waxa kale oo muhiim ah in ay poliisku war ka hayaan danbiyada nacaybka si sidhakhsa ah uu wax uga qabto oo ay ka mid tahay warbixin bulshada ka dhigta aamin.

Maxaa dhici doona marka aan poliiska la hadlo?

Shaqaalaha telefoonka qabanaya waxa ay ku waydiin doonaan su'alo iska fudud oo adiga kugu saabsan oo ay kamid yihiin magacaaga, halka aad dagan tahay, taariikhda dhalashadaada iyo sidii ugu fudud ee laguula soo xidhiidhi karo.

Kadib waxaa aad buuxindoontaa warqad, oo loo gudbindoono qaybta danbiyada nacaybka qaabilsan si baadhitaan loo galiyo. Shaqaalo qaybtaas qaabilsan ayaa kula soo xidhiidhi doona.

Hadii lahelo danbiilayaashana, danbiga ay galeen ayaa la saari doonaa ama waxaa dhicidoona heshiis, waxa ay ku xidhantahay nooca uu yahay danbigu iyo dadka arintan ku dhex jira.

Maan aamini karaa poliiska?

Askarta poliiska iyo shicibka telefoonada qabanayaba waa dad tababar fiican leh. Dacwadaadana si muhiim ah ayaa loo qaabilidoonaa.

Askarta iyo shicibka la shaqeeya waxaa tababar fiican loogu siiyey arimaha ku

saabsan dhibanaha iyo soo saarida danbiyada nacaybka si ay sidii ugu haboon ay kuugu caawiyaan.

Dacwadayda Malaga dhigi karaa sir?

Wixii hadal ama qoraal ah ee uu poliisku kaa qoro waxaa ilaalinaya sharci u gaar ah, markaa waxii aad sheegtidba wuxuu noqoni doonaa wax dibada u baxayn.

Hadii ay dhacdo in qofdanbiga la saaro markaasi lagayaabaa in uu hadalku qaarkiis shacbigu ay maqlaan. Hase yeeshee poliiska baadhista ku jira arintaas wuu kaala hadli doonaa, dabeetana waxaa lagu dhaqaaqi sidii saxda ah ee se adigana kuu haboon.

Ayaan laxidhiidhi karaa si aan u helo warbixin?

Warsoosaarka Poliiska magaalada Ottawa

Qaybta qaabilsan kala duwanaashaha iyo xidhiidhka jinsiyadaha ..... 236-1222, ext. 2226

Qaybta danbiyada nacaybka ..... 236-1222, ext. 2466

Qaybta dhibanaha qaabilsan ..... 236-1222 (TTY 760-8009)

Galbeed ..... ext. 2200 or 2265

Bari ..... ext. 3561

Bartanka ..... ext. 5372

Warsoosaarka dawlada hoose

Laynka caawimaada dhibanaha ee dawlada hoose 1-888-579-2888

Lajnada qaabilsan xuquuqda aadamiga ee gobalka Ontario 1-800-387-9080

Daaficida xuquuqda dadka guryaha kirada ka bixiya, ee gobalka Ontario 1-888-332-3234

Warsoosaarka dawlada sare

Lajnada qaabilsan xuquuqda aadamiga ee wadanka Canada 613-995-1151

Sidee baan u sheegi karaa danbi ku saabsan nacaybka?

Xidhiidh walba waan qiimaynaynaa, laakiin xidhiidh walbe ma ahan mid nafta khatar galinaya oo ay poliisku u arkaan wax dagdag ah.

Siday arintu tahay ba waan idin caawin doonaa, adiguna door baad ka ciyaari kartaa "Ku dhaqaaq sidii saxda ah".

Ku dhaqaaq Sidii saxda ah

9-1-1

Wax dagdag ah oo nafta khatar galinaya ama danbi wakhtigaas dhacaya

230-6211

TTY 232-1123

iyo wixii kale oo isna dagdag ah

236-1222

Xurunta poliiska ee kutaala bulshada dhexdeeda, iyo su'alaha kale eed qabtaan

236-1222 ext. 2466

Hadii loo baahdo waad la xidhiidhi kartaan qaybta danbiyada cadaawada, waxaanad ka tagtaan fariin, kadib askari qaybtaasi ka qaabilsan ayaa idinla soo xidhiidhi doona sidii ugu dhakhsa badan.

Wada shaqaysi si loo helo bulsho aamin ah

Jan 2003